



Ref: MOF/OM/0294/2025

September 30, 2025

**Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Dowladda Federaalka
Soomaaliya**

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda ee DFS;

Isagoo tixraacaya: Faqradda 1(b) ee Qodobka 6-aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, taasoo awood u siinaysa Wasiirka Maaliyadda inuu dejiyo ama beddelo tacriifadaha khidmadaha ee la xiriiira adeegyada ay bixiyaan hay'adaha Dawladda;

Isagoo tixraacaya: Qodobka 3-aad ee Qaraarka Mamnuucidda in Dakhli Dawladeed Lagu Shubo ama Lagu Hayo Koonto Banki ee aan ahayn Khasnadda Mideysan (TSA) ee Golaha Wasiiradu soo saareen 21 Agoosto 2024, kaasoo awood u siinaya Wasiirka Maaliyadda oo kaliya dejinta iyo wax-ka-bedelka dhammaan tacriifadaha saldhiga u ah noocyada kala duwan ee dakhliga Dawladda oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn tacriifadaha dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan;

Isagoo xaqiijinaaya: Dhaqangalka mabda'a lagu sheegay Qodobka 2 (1) (r) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, kaas oo tilmaamaya in dhammaan dakhliga ka soo baxa ilaha lacagta caddaanka ah ee Dawladda iyo hay'adaheeda lagu shubo halka xisaab ee "Khasnadda Mideysan", laguna ilaaliyaa lacagtaas iyada oo la raacayo maareyn hufan oo wax-ku-ool ah;

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha, ee ku taariikhaysan Sebtember 1, 2025;

Wuxuu halkan ku soo saarayaa Xeer-nidaamiyahan, qodobadiisu yihiin kuwaan soo socda:



Qodobka 1-aad
Magaca iyo Ujeeddada

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeerayaa “Xeer-nidaamiyaha Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya”.
2. Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan waa jaangoynta khidmaddaha adeegyada ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, si loo fududeeyo helitaanka adeegyadaas.

Qodobka 2-aad
Jaangoynta Khidmaddaha Adeegyada

1. Qof kasta oo ay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu u fuliso adeeg, waa in uu bixiyo khidmad u dhiganta adeegga la siiyay, taasoo lagu cayimay Jadwallada ku lifaaqan Xeer-nidaamiyahan.
2. Khidmadaha lagu xusay Jadwallada waxay dhaqan-gelayaan laga bilaabo 1-da bisha Oktoobar ee sannadka 2025, iyadoon loo eegin taariikhda dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan. Khidmadahan lama ururin karo ka hor taariikhdaas.

Qodobka 3-aad
Habka Bixinta iyo Ururinta Khidmadaha

1. Khidmadaha adeegyada Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha ee lagu jaangoyay Xeer-nidaamiyahan waxaa awood u leh in ay ururiyaan oo keliya saraakiisha dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, kuwaasoo si rasmi ah loogu xilsaaray ururinta khidmadahaas, si waafaqsan nidaamka maamulka dakhliga.
2. Dhammaan shaqsiyaadka bixinaaya khidmadaha lagu xusay Xeer-nidaamiyahan waa in ay lacagtaas ku shubaan koontooyinka dakhliga aan cashuurta ahayn ee Wasaaradda Maaliyadda uga furan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ama koontooyinka kale ee ka furan bankiyada kale ee gaarka loo leeyahay oo ay Wasaaradda Maaliyadu cayinto.
3. Waa mamnuuc in saraakisha dakhligu u qabtaan khidmadaha si caddaan ah. Dhammaan khidmadaha waa in lagu shubaa koontooyinka dakhliga ee aan cashuurta ahayn ee Wasaaradda Maaliyadda ee la cayimay.

Qodobka 4-aad
Habka Wax-ka-beddelka Jadwallada

1. Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo ka shidaal qaadanaysa talooyinka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, ayaa leh awoodda ay ku cusboonaysiin karto, wax kaga beddeli karto, ama ku kordhin karto Jadwallada ku lifaaqan Xeer-nidaamiyahan.
2. Dhammaan cusboonaysiinta ama wax-ka-beddellada lagu sameeyo Jadwallada waa in lagu faafiyo hab la mid ah kan lagu faafiyey Xeer-nidaamiyahan, waxayna



dhaqan-gelayaan taariikhda lagu xusay Xeer-nidaamiyaha cusub ee wax-ka-beddelka samaynaaya.

Qodobka 5-aad

Habka Bixinta Shatiyada Guud

1. Iyadoo la og yahay in Jadwallada ku lifaaqan Xeer-nidaamiyahan aysan si buuxda u daboolin dhammaan noocyada ganacsiyada kala duwan, Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu waxay bixin kartaa Shatiyada Guud oo ku hoos xusan kuwa ka mid ah qaybaha ganacsiyeed ee waaweyn ee ku qeexan Jadwalka 2-aad. Shatiyadaan Guud waxay fursad u siinayaan ganacsiyada aan si gaar ah loogu xusin Jadwalka 2-aad in ay si sharci ah isu diiwaangeliyaan inta si rasmi ah nuuca ganacsigooda loogu daraayo Jadwalka 2-aad.

2. Shirkad si ku-meel-gaar ah uga diiwaangashan Shati Guud, marka la cusbooneysiyo Jadwalka 2-aad oo lagu daro ganacsiga ay qabato, waxay xaq u leedahay in ay beddesho shatigeeda si ay ugu wareegto shatiga ganacsiyeed ee si gaar ah ula xiriira ganacsiga ay qabato. Marka ay dhammaato muddada Shatiga Guud, waxaa qasab ah in shirkadda sida ku-meel-gaarka ah uga diiwaangashan Shati Guud ay qaadato shatiga ku habboon marka ay cusboonaysiinayso shatigeeda haddii shatiga ganacsiga ay qabato markaas si cad loogu xusay Jadwalka 2-aad. U hogaansami la'aanta faqraddaan waxay horseedi doontaa xad gudub ka dhan ah Xeer-nidaamiyahan, waxaana ka dhalan doona talaabooyin ay ka mid yihiin kala noqoshada shatiga.

3. Shatiga Guud lama bixin karo ilaa iyo inta si rasmi ah looga hubinaayo in hawsha ganacsiyeed ee codsaduho qabanayo aysan ka mid ahayn ganacsiyada sida gaarka shatiyadooda loogu xusay Jadwalka 2-aad.

Qodobka 6-aad

Xeerarka Guud ee Hagista Ganacsiga

1. Ganacsi kasta waa in uu helo hal shati oo u gaar ah hawshiisa ugu weyn. Hawlaha yaryar ee ganacsiga ee aan soo xarayn in ka badnayn boqolkiiba labaatan iyo shan (25%) dakhliga guud ee ganacsiga, waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin hawlo kaabe u ah hawshiisa ugu weyn, waxaana loo qaddarin doonaa in shatiga u gaarka ah hawshiisa ugu weyn u oggolaanaayo qabashada hawshaas, una baahnayn shati kale. Balse, haddii hawsha yar ay tahay mid leh nidaam gaar ah oo korjoogtayn, waa in shati gaar ah loo helo, xataa haddii dakhligedu ka yaryahay xadka lasoo xusay.

2. Khidmadaha shatiyada ee lagu caddeeyay Jadwalka 2-aad ee Xeer-nidaamiyahan waxay waajibayaan waqtiga qaadashada shatiga koowaad iyo marka la cusboonaysiinayo sannad kasta.

Qodobka 7-aad

Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyahan

1. Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda. Si kastaba ha ahaatee, khidmadaha lagu xusay Jadwallada waxay dhaqan gelayaan 1-da Oktoobar, 2025, sida ku cad Qodobka 2(2).



2. Nuqulada Xeer-nidaamiyahan iyo Jadwallada la socda waxaa lagu daabici doonaa bogga rasmiga ah ee Wasaaradda Maaliyadda. Waxa kale oo lagu daabici doona bogga rasmiga ah ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

3. Dhammaan xeer-nidaamiyayaashii, ama wareegtooyinkii hore ee khilaafsan Xeer-nidaamiyahan iyo Jadwalladii la socday halkan ayaa lagu beddelay.

Fulin wacan,

Xil.Biixi Iimaan Cige
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda



**JADWALLADA XEER-NIDAAMIYAHA JAANGOYNTA KHIDMADDAHA
ADEEGYADA WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA**

Si waafaqsan Qodobka 2 ee Xeer-nidaamiyahan, Jadwalladan hoos ku xusan waa qayb ka mid ah Xeer-nidaamiyahan:

**(1) Jadwalka Khidmadaha Diwaangelinta iyo Wax-ka-beddelka
Xogaha Shirkadaha (*Company Registration & Change of Particulars*)**

Lr.	Nuuga Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
1.	Diiwaangelinta Shirkadaha (<i>Business/Company Registration</i>)	50
2.	Qabashada Magac Shirkad (<i>Name Reservation</i>)	20
3.	Ogeysiinta Isbeddelka Xogaha Shirkadda (<i>Change of Business Particulars Notification</i>)	40
4.	Diiwaangelinta Isku-biirista iyo Iibsiga Shirkaddaha (<i>Registration of Mergers and Acquisitions</i>)	500

(2) Jadwalka Khidmadaha Shatiyada Ganacsiga (*Commercial Licenses*)

Lr.	Nuuga Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
Shatiga Soo-dejinta iyo Dhoofinta (<i>Import & Export</i>)		
1.	Shatiga Ganacsiga Soo-dejinta Cuntada (<i>Foodstuffs Import Commercial License</i>)	300
2.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Soo-dejinta Badeecooyinka aan Cuntada ahayn (<i>General Non-Foodstuffs Import Commercial License</i>)	500
3.	Shatiga Ganacsiga Dhoofinta Badeecadaha Caadiga ah (<i>Standard Goods Export Commercial License</i>)	150
4.	Shatiga Ganacsiga Soo-dejinta iyo Dhoofinta (<i>Combined Import and Export Commercial License</i>)	1,000
5.	Shatiga Ganacsiga Dhoofinta Macdanta Qaaliga ah (<i>Precious Minerals Export Commercial License</i>)	1,000



Shatiga Ganacsiyada Tafaariiqda iyo Dhijitaalka (Retail & E-Commerce)		
6.	Shatiga Ganacsiga Dukaamada Tafaariiqda (<i>Retail Shop Commercial License</i>)	200
7.	Shatiga Ganacsiga Goobaha Ganacsi ee Yaryar (<i>Kiosk Commercial License</i>)	200
8.	Shatiga Ganacsiga Goobaha Is-qurxinta (<i>Beauty Salon Commercial License</i>)	200
9.	Shatiga Ganacsiga Goobaha Cuntada iyo Cabitaan Fudud (<i>Café Commercial License</i>)	200
10.	Shatiga Ganacsiga Goobaha Shidaalka (<i>Petrol Station Commercial License</i>)	300
11.	Shatiga Ganacsiga Dukaamada Dhijitaalka ah ee Ganacsiga (<i>E-commerce Store Commercial License</i>)	200
12.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Tafaariiqda iyo Dhijitaalka (<i>General Retail & E-Commerce Commercial License</i>)	200
Cuntada iyo Adeegyada Hoyga (Food & Hospitality Services)		
13.	Shatiga Ganacsiga Huteellada (<i>Hotel Commercial License</i>)	300
14.	Shatiga Ganacsiga Maqaayaddaha (<i>Restaurant Commercial License</i>)	300
15.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Cuntada ee Munaasabaddaha Banaanka (<i>Catering Services Commercial License</i>)	300
16.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Cuntada iyo Hoyga (<i>General Food & Hospitality Services Commercial License</i>)	300
Adeegyada Dhismaha iyo Guryaha (Construction & Real Estate Services)		
17.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Dhismaha (<i>Construction Commercial License</i>)	300
18.	Shatiga Ganacsiga Horumarinta Dhulka iyo Guryaha (<i>Real Estate Developer Commercial License</i>)	300
19.	Shatiga Ganacsiga Dallaalka Dhulka iyo Guryaha (<i>Real Estate Agent Commercial License</i>)	300



Adeegyada Gaadiidka iyo Saadka (Transport & Logistics Services)		
20.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Gaadiidka Xamuulka (<i>Freight Commercial License</i>)	300
21.	Shatiga Ganacsiga Wakiillada Rarka iyo Daabulka (<i>Clearance & Forwarding Agent Commercial License</i>)	300
22.	Shatiga Ganacsiga Wakiillada Maraakiibta (<i>Shipping Agency Commercial License</i>)	300
23.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Gaarsiinta Badeecadaha (<i>Delivery Services Commercial License</i>)	300
24.	Shatiga Ganacsiga Kireynta Gaadiidka (<i>Vehicle Hire Commercial License</i>)	300
25.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Kaydinta ee Bakhaarada (<i>Warehouse Commercial License</i>)	300
Adeegyada Duulista iyo Diyaaradaha (Aviation & Airline Services)		
26.	Shatiga Ganacsiga Diyaaradaha Rakaabka (<i>Passenger Airline Commercial License</i>)	\$500
27.	Shatiga Ganacsiga Diyaaradaha Xamuulka (<i>Cargo Airline Commercial License</i>)	\$300
28.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Iibinta Tigidhada Diyaaradaha (<i>Airline Ticketing Commercial License</i>)	\$300
29.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Rakaabka Garoomada Diyaaradaha (<i>Passenger Handling Services Commercial License</i>)	\$300
30.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Gaadiidka Rakaabka Diyaaradaha (<i>Passenger Shuttle Commercial License</i>)	\$300
31.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Rakaabka Saaran Diyaaradaha (<i>Inflight Services Commercial License</i>)	\$300
32.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Dayactirka Diyaaradaha (<i>Aircraft Servicing Commercial License</i>)	\$300
Adeegyada Maaliyadda iyo Caymiska (Financial & Insurance Services)		



33.	Shatiga Ganacsiga ee Bangiyada (<i>Banking Commercial License</i>)	1,000
34.	Shatiga Ganacsiga Maalgelinta Yar-yar (<i>Microfinance Institution Commercial License</i>)	300
35.	Shatiga Ganacsiga Sarifka Lacagaha Qalaad (<i>Foreign Exchange Bureau Commercial License</i>)	500
36.	Shatiga Ganacsiga Maalgelinta Dhismayaasha (<i>Mortgage Finance Commercial License</i>)	300
37.	Shatiga Ganacsiga Xawilaadda Lacagaha (<i>Money Transfer Commercial License</i>)	500
38.	Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Tixraaca Deymaha (<i>Credit Reference Bureau Commercial License</i>)	500
39.	Shatiga Ganacsiga Xarun-Maaliyadeedka Bulsho (<i>Building Society Commercial License</i>)	500
40.	Shatiga Ganacsiga Iskaashatada Kaydka iyo Deymaha (<i>Savings & Credit Cooperative Commercial License</i>)	500
41.	Shatiga Ganacsiga Maalgelinta Horumarka (<i>Development Finance Commercial License</i>)	500
42.	Shatiga Ganacsiga Kireynta Raasamaalka (<i>Financial Leasing Commercial License</i>)	500
43.	Shatiga Ganacsiga Haftada (<i>Hire Purchase Commercial License</i>)	500
44.	Shatiga Ganacsiga Lacagaha Mobilka (<i>Mobile Money Commercial License</i>)	500
45.	Shatiga Ganacsiga Caymiska (<i>Insurance Commercial License</i>)	1,000
46.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Adeegyada Maaliyadda (<i>General Financial Services Commercial License</i>)	1,000
Adeegyada Caafimaadka iyo Daawada (<i>Health & Medical Services</i>)		
47.	Shatiga Ganacsiga Rugaha Caafimaadka (<i>Clinic Commercial License</i>)	300
48.	Shatiga Ganacsiga Farmashiyasha (<i>Pharmacy Commercial License</i>)	300
49.	Shatiga Ganacsiga Isbitaallada (<i>Hospital Commercial License</i>)	500



50.	Shatiga Ganacsiga Rugaha Adeegyada Fisioterabiga (<i>Physiotherapy Services Commercial License</i>)	300
51.	Shatiga Ganacsiga Rugaha Caafimaadka Ilkaha (<i>Dental Clinic Commercial License</i>)	300
52.	Shatiga Ganacsiga Dukaamada Dawooyinka (<i>Drug Shop Commercial License</i>)	300
53.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Gaadiidka Gurmada Degdega ah (<i>Ambulance Services Commercial License</i>)	300
54.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Caafimaadka iyo Daawada (<i>General Health & Medical Services Commercial License</i>)	300
Warshadaha (Manufacturing)		
55.	Shatiga Ganacsiga Warshadaha Yaryar (<i>Micro and Small-scale Factory Commercial License</i>)	100
56.	Shatiga Ganacsiga Warshadaha Dhexdhexaadka ah (<i>Medium-size Factory Commercial License</i>)	300
57.	Shatiga Ganacsiga Warshadaha Waaweyn (<i>Large Factory Commercial License</i>)	300
Waxbarashada iyo Tababarada (Education & Training)		
58.	Shatiga Ganacsiga Dugsiyada Hoose (<i>Primary School Commercial License</i>)	200
59.	Shatiga Ganacsiga Dugsiyada Sare (<i>Secondary School Commercial License</i>)	200
60.	Shatiga Ganacsiga Machadyada Waxbarashada Farsamada iyo Xirfadaha (<i>TVET Institution Commercial License</i>)	200
61.	Shatiga Ganacsiga Jaamacaddaha ama Kuliyadaha (<i>University/College Commercial License</i>)	500
62.	Shatiga Ganacsiga Dugsiyada Xannanada Carruurta (<i>Kindergarten Commercial License</i>)	200
63.	Shatiga Ganacsiga Xarumaha Tababarada iyo Dhisidda Xirfadaha (<i>Training & Capacity Building Services Commercial License</i>)	200
64.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Waxbarashada iyo Tababarka (<i>General Education & Training Commercial License</i>)	200



Adeegyada La-talinta Xirfadeeysan (Professional Advisory Services)		
65.	Shatiga Ganacsiga Xafiisyada La-talinta Sharciga (<i>Law Firm Commercial License</i>)	300
66.	Shatiga Ganacsiga Xafiisyada Hantidhawrista (<i>Audit Firm Commercial License</i>)	300
67.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Talo-bixinta Xirfadeed (<i>Professional Consultancy Firm Commercial License</i>)	300
68.	Shatiga Ganacsiga Xarumaha Adeegyada Cilmi-baarista iyo Horumarinta (<i>Research & Development Services Commercial License</i>)	300
69.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Turjumaada (<i>Translation Services Commercial License</i>)	300
70.	Shatiga Ganacsiga Xafiisyada Adeegyada Xisaabaadka (<i>Accountancy Firm Commercial License</i>)	300
71.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Injineerniyada (<i>Engineering Services Commercial License</i>)	300
72.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Naqshadeynta Dhismayaasha (<i>Architectural Services Commercial License</i>)	300
73.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Daabacaadda (<i>Printing Services Commercial License</i>)	300
74.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Suuq-geynta iyo Xayeysiinta (<i>Advertising & Marketing Services Commercial License</i>)	300
Warbaahinta, Farshaxanka iyo Madadaalada (Media, Arts & Entertainment)		
75.	Shatiga Ganacsiga Xarumaha Warbaahinta (<i>Media House Commercial License</i>)	300
76.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Filimada iyo Shineemooyinka (<i>Film & Cinema Services Commercial License</i>)	300
77.	Shatiga Ganacsiga Goobaha Fanka iyo Dhaqanka (<i>Performing Arts & Cultural Venue Commercial License</i>)	300
78.	Shatiga Ganacsiga Xarumaha Muusikada iyo Duubistooda (<i>Music & Recording Studio Commercial License</i>)	300



79.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Warbaahinta, Farshaxanka & Madadaalada (<i>General Media, Arts & Entertainment Services Commercial License</i>)	300
Adeegyada Socdaalka iyo Dalxiiska Gaarka ah (<i>Specialized Travel & Tourism Services</i>)		
80.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Socdaalka Xajka iyo Cumrada (<i>Hajj and Umrah Travel Services Commercial License</i>)	300
81.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada iyo Hawlaha Dalxiiska (<i>Tourism & Tour Operations Commercial License</i>)	300
Beeraha, Xoolaha iyo Kalluumaysiga (<i>Agriculture, Livestock & Fisheries</i>)		
82.	Shatiga Ganacsiga Ganacsiyada Dalag Beerista (<i>Crop Farming Commercial License</i>)	150
83.	Shatiga Ganacsiga Xoolo Dhaqashada (<i>Livestock Farming Commercial License</i>)	150
84.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Taageera Xoolo Dhaqashada (<i>Livestock Support Services Commercial License</i>)	150
85.	Shatiga Ganacsiga Kalluumaysiga iyo Beerista Kalluunka (<i>Fish Harvesting & Farming Operations Commercial License</i>)	150
86.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Habaynta Kalluunka iyo Kordhinta Qiimihiisa (<i>Fish Processing & Value Addition Services Commercial License</i>)	150
87.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Caafimaadka Xoolaha (<i>Veterinary Services Commercial License</i>)	150
88.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Kahortagga Cudurrada Xoolaha (<i>Livestock Quarantine Services Commercial License</i>)	150
89.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Beeraha, Xoolaha iyo Kalluumaysiga (<i>General Agriculture, Livestock & Fisheries Commercial License</i>)	200
Adeegyada Maareynta Qashinka iyo Deegaanka (<i>Waste Management & Environmental Services</i>)		
90.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Nadaafadda iyo Fayadhawrka (<i>Sanitation & Hygiene Services Commercial License</i>)	150



91.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Dib-u-warshadaynta Qashinka (<i>Waste Recycling Services Commercial License</i>)	150
92.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Ururinta Qashinka (<i>Waste Collection Services Commercial License</i>)	150
Isgaarsiinta (Telecommunications)		
93.	Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Bixiyaha Kaabayaasha Isgaarsiinta (<i>Communications Infrastructure Provider Commercial License</i>)	1,000
94.	Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Bixiyaha Kaabayaasha iyo Adeegyada Isgaarsiinta (<i>Communications Infrastructure & Services Provider Commercial License</i>)	1,000
95.	Shatiga Ganacsiga Barnaamijyada iyo Adeegyada Dhijitaalka ah ee Isgaarsiinta (<i>Applications & Services Provider Commercial License</i>)	500
96.	Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Bixiyaha Qalabka Isku-xirka ee Isgaarsiinta (<i>Terminal Equipment Provider Commercial License</i>)	500
97.	Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Bixiya Adeegyada Isgaarsiinta ee Ku Saleysan Satellite-ka (<i>VSAT Services Provider Commercial License</i>)	500
Adeegyada Teknolojiyadda Macluumaadka (ICT Services)		
98.	Shatiga Ganacsiga Horumarinta Barnaamijyada iyo Bixinta Adeegyada Dhijitaalka ah (<i>Software Development & Digital Services Commercial License</i>)	200
99.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Teknolojiyadda Macluumaadka (<i>IT Services Commercial License</i>)	200
100.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Bixinta Internet-ka (<i>Internet Service Provider Commercial License</i>)	200
101.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Amniga Internet-ka (<i>Cybersecurity Services Commercial License</i>)	200
102.	Shatiga Ganacsiga Guud ee Teknolojiyadda Macluumaadka (<i>General ICT Services Commercial License</i>)	200
Macdanta iyo Kheyraadka Dabiiciga ah (Mining & Mineral Resources)		
103.	Shatiga Ganacsiga Qodista iyo Soo-saarista Macdanta (<i>Mineral Extraction Commercial License</i>)	1,000



104.	Shatiga Ganacsiga Sahminta iyo Baarista Macdanta (<i>Mineral Exploration Commercial License</i>)	1,000
105.	Shatiga Ganacsiga Nadiifinta iyo Sifeeynta Macdanta (<i>Mineral Refining Services Commercial License</i>)	1,000
Shatiga Ganacsiga Badeecooyinka Xaddidan (<i>Special Trade License for Restricted Goods</i>)		
106.	Shatiga Ganacsiga Dhoofinta Biraha Duugoobay (<i>Scrap Metal Export Commercial License</i>)	1,000
107.	Shatiga Ganacsiga Soo-dejinta iyo Iibinta Qaadka (<i>Khat Import & Sale Commercial License</i>)	2,000
108.	Shatiga Ganacsiga Soo-dejinta iyo Qaybinta Tubaakada (<i>Tobacco Import & Distribution Commercial License</i>)	2,000
Adeegyada Bulshada iyo Daryeel Shakhsiyeedka (<i>Social & Personal Care Services</i>)		
109.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Qabanqaabada iyo Maareynta Munaasabadaha (<i>Event Planning & Management Services Commercial License</i>)	150
110.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Jimicsiga iyo Tababar Shakhsiyeedka (<i>Fitness & Personal Training Services Commercial License</i>)	150
111.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Daryeel Shakhsiyeedka (<i>Personal Care Services Commercial License</i>)	150
Goobaha Waaweyn ee Ganacsiga Tafaariiqda (<i>Large-Scale Retail Outlets</i>)		
112.	Shatiga Ganacsiga Maareynta Suuqyada Waaweyn (<i>Mall Management Commercial License</i>)	500
113.	Shatiga Ganacsiga Suuqyada Weyn (<i>Hypermarket Commercial License</i>)	500
114.	Shatiga Ganacsiga Suuqyada Dhexdhexaadka ah (<i>Supermarket Commercial License</i>)	500
Korontada iyo Tamarta Nadiifka ah (<i>Electricity & Renewable Energy</i>)		
115.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Bixinta Korontada (<i>Electricity Services Commercial License</i>)	1,000



116.	Shatiga Ganacsiga Soo-saarista Tamarta Korontada (<i>Electricity Generation Commercial License</i>)	500
117.	Shatiga Ganacsiga Qaybinta Korontada (<i>Electricity Distribution Commercial License</i>)	500
118.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Tamarta Nadiifka ah (<i>Renewable Energy Services Commercial License</i>)	300
119.	Shatiga Ganacsiga Rakibidda Korontada iyo Qalabkeeda (<i>Electrical Installation Services Commercial License</i>)	300
Adeegyada Ammaanka iyo Ilaalada (<i>Security & Protective Services</i>)		
120.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Ammaanka iyo Ilaalada (<i>Security & Guard Services Commercial License</i>)	500
121.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Kormeerka iyo Baaritaanka Gaarka ah (<i>Surveillance & Investigation Services Commercial License</i>)	500
122.	Shatiga Ganacsiga Adeegyada Digniinta Ammaanka (<i>Security Alarm Services Commercial License</i>)	500

(3) Jadwalka Khidmadaha Diiwaangelinta iyo Ilaalinta Summadaha Ganacsiga (*Trademarks*)

Lr.	Nuuga Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
1.	Diiwaangelinta Summad Ganacsi (<i>Trademark Registration</i>)	\$700
2.	Cusbooneysiinta 10-sano kasta (<i>Renewal every 10 years</i>)	\$700
3.	Ganaaxa Ka-daahista Cusbooneysiinta Diiwaangelinta (<i>Late Renewal Surcharge</i>)	\$200
4.	Cabashada Ka Dhan ah Codsii Diiwaangelin Summad Ganacsi (<i>Opposition Filing</i>)	\$150



**(4) Jadwalka Khidmadaha Diiwaangelinta iyo Ilaalinta
Ikhtiraacyada (Patents)**

Lr.	Waqtiga	Nuuca Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
1.	Xilliga Soo-gudbinta Codsiga Diiwaangelinta ee Sanadka 1-aad (<i>At filing in Year 1</i>)	Soo-gudbinta Codsiga Diiwaangelinta (<i>Application Filing</i>)	\$150
2.	Marka la Oggolaado Codsiga (<i>Upon grant</i>)	Oggolaashaha & Diiwaangelinta Rasmiga ah ee Xuquuqda Ikhtiraaca (<i>Patent Grant</i>)	\$500
3.	Lix bilood kadib Taariikhda Khidmaddu Waajibtay (<i>Within 6 months after due date</i>)	Ganaaxa La-daahista Bixinta Khidmadda Ilaalinta Xuquuqda Ikhtiraaca (<i>Late Maintenance Surcharge</i>)	\$300
4.	Sanadka 5-aad (<i>Year 5</i>)	Ilaalinta Xuquuqda Ikhtiraaca 5-sano kasta (<i>Maintenance every 5 years</i>)	\$500
5.	Sanadka 10-aad (<i>Year 10</i>)	Ilaalinta Xuquuqda Ikhtiraaca 5-sano kasta (<i>Maintenance every 5 years</i>)	\$800
6.	Sanadka 15-aad (<i>Year 15</i>)	Ilaalinta Xuquuqda Ikhtiraaca 5-sano kasta (<i>Maintenance every 5 years</i>)	\$1,200
7.	Sanadka 20-aad (<i>Year 20</i>)	Ilaalinta Xuquuqda Ikhtiraaca 5-sano kasta (<i>Maintenance every 5 years</i>)	\$1,500

**(5) Jadwalka Khidmadaha Diiwaangelinta iyo Ilaalinta
Naqshad Warshadeedka (Industrial Designs)**

Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
1.	Diiwaangelinta Naqshad Warshadeed (<i>Industrial Design Registration</i>)	\$400
2.	Cusbooneysiinta 5-sano kasta (<i>Renewal every 5 years</i>)	\$400
3.	Ganaaxa Ka-daahista Cusbooneysiinta Diiwaangelinta Lix bilood kadib Taariikhda Khidmaddu Waajibtay (<i>Late Renewal Surcharge within 6 months of due date</i>)	\$150



**(6) Jadwalka Khidmadaha Wareejinta Milkiyadda Hantida
Garaadka (Transfer & Assignment of Ownership Rights)**

Lr.	Nuuca Adeegga	Khidmadda (Oo ah Doolarka Maraykanka)
1.	Soo-gudbinta Codsiga Wareejinta Milkiyadda Hantida Garaadka (Assignment Application)	\$50
2.	Diiwaangelinta Wareejinta Milkiyadda Hantida Garaadka (Assignment Registration)	\$100
3.	Wax ka beddelka Magaca/Cinwaanka ee Diiwaanka Milkiilaha Hantida Garaadka (Change of Name/Address Fee for Intellectual Property Ownership Records)	\$80

